

Amar lamba. 24 rep.

Samaynta warqadda aqoonsiga.

MAAMULKA MAXMIYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULAHA

Markuu arkay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9kii Disembar 1952. lamba. 2357;

Markuu Tixgeliyay inay ku habboon tahay in laga hubiyo dadka warqadaha aqoonsiga oo ku habboon. ee deggan degmooyinka dalka;

Markuu dhaghaystay talada Guddiga Maamulka;

Markuu arkay qod. 4 ee mabaadi'da ku xusan dastuurka kuna lifaaqan heshiiska ilaalinta;

Markuu arkay qod. 8 ee heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliyeed;

Markuu arkay qod. 4 ee Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda 9 Disembar 1952. lamba. 2357.

Wuxuu Amarayaa

Dhammaan dadka labka iyo dheddigga ah iyo wixii ka weyn 15, ee ku nool degmooyinka dalka waa inay haystaan warqadda aqoonsiga. Si kastaba ha noqotee, haweenku way codsan karaan.

Kaararka aqoonsiga waxaa bixiya Madaxda Maamulada Dowlada Hoose; waxay shaqeynayaan shan sano waana inay u hogaansamaan tusaalaha uu dejisay Mamulka Aaminaadda Talyaaniga (A.F.I.S).

Dadka haysta baasaboor ama ogolaansho ama dukumeenti kale oo aqoonsi ah oo ay soo saareen Maamulka oo xaq u leh inay soo saaraan dukumiinti aqoonsi ayaa laga dhaafay waajibaadka helitaanka warqaddan aqoonsiga.

Dembiilayaasha waxaa lagu ciqaabayaa ganaax min So. 5 ilaa So. 100.

Maamuluhu wuxuu amar ku bixin doonaa qodobbada lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta qaynuunkan

Muqdisho, Disembar 30, 1953.

Maamulaha

Martino